**DOWLAD-GOBOLEEDKA JUBBALAND EE SOOMAALIYA**

# Xeer-nidaamiyaha 13aad ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda

# Miisaaniyadaha Qaab-dhismeedka Hay'adeed, Dhisidda iyo Shaqaale-u-sameynta Hay'ad Dowladeed

**Tusmo**

***1. Hordhac......1***

1.1. Awoodda, Hadafka iyo Baaxadda......1

1.2. Mabaa'diida Hagaya......1

1.3. Waxa lagu maamulayo......1

1.4. Erey-bixinta......2

***2. Mas'uuliyadaha Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda......3***

***3. Qaab-dhismeedka hay'adeed iyo shaqaalaha......4***

***4. Dib-u-eegista hay'adda......5***

***5. Miisaaniyadda iyo Lacagaha ugu Badan ee Ku Baxaya Shaqaalaha......6***

***6. Tilmaamaha Qoran ee Shaqada......6***

***7. Dib-u-eegis uu Hay'adaha ku sameeyo Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladad 7***

***8. Cabashooyinka iyo Rafcaannada......7***

***9. Ansaxinta Xeer-nidaamiyaha......7***

# 1. Hordhac

## 1.1. Awoodda, Hadafka iyo Baaxadda

1.1.1. Xeer-nidaamiyahan waxaa la soo saarey iyada oo laga ambaqaadayo Qodobka 31aad, Faqradda 31.1 ee Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee 2017 ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya

1.1.2. Xeer-nidaamiyahan waa "xeer la diidi karo" sida loogu qeexay Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee 2017 waxaana sida ay sheegayso faqradda 1.4.1(f) marayaa muddo aan ka badneyn toban (10) maalmood oo uu dib-u-eegis ku sameynayo Baarlamaanka

1.1.3. Xeer-nidaamiyaha waxaa uu sameynayaa habraacyada ay tahay in ay raacaan Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda iyo Hay'adda Loo Shaqeeyo marka ay la tacaamulayaan Miisaaniyadaha Qaab-dhismeedka Hay'adeed, Dhisidda iyo Shaqaale-u-sameynta hay'ad dowladeedee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya.

## 1.2. Mabaa'diida Hagaya

1.2.1. Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda waxaa hagaya mabaa'diida naxariista, daah-furnaanta, bulsho-u-adeegga, ixtiraamidda ku kala-dambeynta maamulka, daacadnimada, sirnimada, anshax hawleed, hufnaanta, waxtarka, xirfadlenimo, xaq ku shaqeyn, sinnaan iyo hababka ugu wanaagsan ee hawlqabadka

1.2.2. Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda waa in ay mabaa'diidan ku saleeyaan la-dhaqankooda marka ay la tacaamulayaan saraakiisha la soo doortey, Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee ay wada shaqeeyaan, iyo dadweynaha.

1.2.3. Saraakiisha la soo doorto waa in ay mabaa'diidan ku saleeyaan la-dhaqankooda Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.

1.2.4. Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda waxaa shaqaaleyntooda ku saleysan tahay aqoontooda iyo kartidooda ka dib marka ay ka soo baxaan habraacyada soo-xulidda ee uu dhigayo sharcigan iyo xeer-nidaamiyeyaasha iyo dhabbe-tuseyaasha la xiriira.

## 1.3. Waxa lagu maamulayo

1.3.1. Marka laga reebo waxa xagga hoose lagu cayimey, xeer-nidaamiyahan waxaa lagu maamulayaa Miisaniyadaha Qaab-dhismeedka Hay'adeed, Dhisidda iyo Shaqaale-u-sameynta hay'ad dowladeed ee Dowlad-goboleedka Jubbaland oo mushaarkooda laga bixiyo Miisaaniyadda Mideysan

1.3.2. Xeer-nidaamiyahan waxaa sidoo kale lagu maamulayaa shaqaalaha loo magacaabey jagooyin ka mid ah Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee maaliyaddoodu ay bixinayaan deeq-bixiyeyaal, sida ku xusan Qodobka 22aad ee Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee 2017.

1.3.3. Xeer-nidaamiyahan laguma maamulayo:

a) Xubnaha ka tirsan ciidanka booliska, ciidamada amniga, iyo ciidamada qalabka sida
b) Xubnaha garsoorka
c) Saraakiisha la soo doorto
d) Wasiirrada, Wasiir-ku-xigeennada iyo xubnaha golayaasha ama Guddiyada uu magacaabo Madaxweynaha
e) Shaqaalaha sharikaadka ganacsi ee ay dowladdu leedahay oo u shaqeeya qaab ganacsi
f) Shaqaalaha loo qorto Qandaraasyo Muddo Go'an socda si ay u bixiyaan adeegyo xirfadeed kuwaas oo ah kuwo gaar ah oo ka madax-bannaan hay'adda Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda
g) Shaqaalaha u shaqeeya qandaraasle ay dowladdu u qaadatey in uu bixiyo adeegyo.

1.4. <u>Erey-bixinta</u>

1.4.1. Xeer-nidaamiyahan dhexdiisa, ereyadan waxaa ay yeelanayaan macnaha soo socda;

a) ***""Guddiga Rafcaanka***" waxaa loola jeedaa hay'adda uu Guddoomiyaha Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah u magacaabo in ay dhegeysato rafcaannada ka dhanka ah ciqaabaha anshax-marinta ah ama cabashooyinka ka dhasha go'aamo ay gaartey Hay'ad Loo Shaqeeyo.

b) ***"Shaqaale Rayid ah oo Dowladeed"*** waxaa loola jeedaa qof u shaqeeya Hay'ad Loo Shaqeeyo oo mushaarkiisa laga bixiyo Miisaaniyadda Mideysan ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya sida ay dhigeyso faqradda 4.1e) ee Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee 2017.

c) ***"Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda"*** waxaa loola jeedaa Shaqaalaha Rayidka ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya. Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladdu waxaa ay si waafaqsan qodobbada xeerkan u qabtaan dhammaan hawlaha fulinta iyo kuwa maamul iyo adeeg-bixin ee Dowladda.

d) ***"Guddiga"*** waxaa loola jeedaa Guddiga Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda ee lagu dhisey Xeerka Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.

e) ***"Madax-Waaxeed"*** waxaa loola jeedaa waax heerkeedu gaarsiisan yahay Agaasime.

f) ***"Xeer la diidi karo"***waxaa loola jeedaa Xeer-nidaamiye uu Baarlamaanku u haysto muddo cayiman oo uu kaga soo horjeesan karo (diidi karo) ka hor inta *Xeer-nidaamuyuhu* dhaqangal noqon.

g) ***"Hay'ad Loo Shaqeeyo"*** waxaa loola jeedaa Wasaarad, wakaalad ka tirsan Wasaarad, ama Guddi Madax-bannaan oo Dowlad-

goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya ka mid ah oo shaqaaleysta Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.

h) ***Qof Shaqaale ah"*** waxaa loola jeedaa Qof Shaqaale Rayid ah oo Dowladeed ah oo ay shaqaaleysatey Hay'ad Loo Shaqeeyo..

i) ***"Madaxa Hay'adda Loo Shaqeynayo"*** waxaa uu macnaheedu yahay Agaasimaha Guud (Xoghayaha Joogtada ah) ee Wasaarad ama sarkaal gacanta ku haya hawlaha fulinta ee Hay'adda Loo Shaqeynayo

j) ***"Tilmaammo/amarro"***waxaa loola jeedaa xeerar, buugaag, amarro, dhabbe-tuseyaal iyo ogeysiisyo waxaana soo saara Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda oo u maraya Guddoomiyaha Guddiga. Tilmaamaha (amarrada) waxaa ay caadi ahaan tahay in islamarkaa ama waqti cayiman lagu fuliyo.

k) ***"Maareeye"*** waxaa loola jeedaa qofka sida tooska ah uu u hoos tago Qofka ka tirsan Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda

l) ***"Wasaarad"*** waxaa loola jeedaa Wasaarad ka mid ah Laanta Fulinta ee la dhisey iyada oo la raacayo dastuurka Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya.

m) ***"Xeer-nidaamiye"***waa *xeer la diidi karo* oo bixinaya xeerar faahfaahsan oo uu diyaariyo uuna soo saaro Guddoomiyaha Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda si loogu hawlgeliyo waxyaabaha uu dhigayo Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee 2017. Xeer-nidaamiyeyaashan waa kuwo ay waajib tahay in loo hoggaansamo laakiin ma aha Xeer uu soo saarey Baarlamaanka.

## 2. Mas'uuliyadaha Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda

2.1. Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ayaa ka mas'uul ah isuduwidda iyo ansaxinta qorsheyaasha tababarka iyo kobcinta ee Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.

2.2. Sida ay dhigeyso Faqradda 5.1 ee Xeerka Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee 2017 Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda waxaa uu ka mas'uul yahay kormeeridda habsami u shaqeynta Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda iyo in uu hubiyo in Shaqaalaha Rayidka ah ay hawshoodu tahay mid hufan oo waxtar leh marka ay u shaqeynayaan bulshada, iyo in lagu fulin karo kheyraad miisaaniyadeed ee degaanada dowlad-goboleedka, ayna shaqadoodu u sal tahay aqoon iyo korti iyo fursado loo siman yahay.

2.3. Sida uu dhigayo Qodobka 7aad, Baragaraafyada 7.1c), 7.1d) iyo 7.1f) ee Xeerka Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda, Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda waxa ay mas'uuliyaddiisu tahay:

a) In uu hayo diiwaannada xogta jago/shaqaale kasta oo ay leedahay hay'ad

maamul oo kasta oo misaaniyad loo ansaxiyey.

b) In uu hayo diiwaanka xogta dhammaan shaqaalaha u shaqeeya maamulka, jagooyinka loo qaatey, iyo mushaarkooda

c) In isaga iyo Wasaaradda Maaliyadda oo wadajira, talooyin ay Golaha Wasiirrada ka siiyaan tirada iyo heerarka darajooyinka shaqaalaha hay'adda Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda iyo mushaaraadka, gunnooyinka iyo xuquuqaha kale ee Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda iyaga oo ku xisaabtamaya xaaladaha dhaqaale iyo culeysyada miisaaniyadeed ee jira.

# 3. Qaab-dhismeedka hay'adeed iyo shaqaalaha

3.1. Hay'adda dowladda waa in loo qaabeeya sida ugu hufan xagga kharashka ku baxa lana hubiyaa tayada tayada adeeg-bixinta ay siiyaan bulshada.

3.2. Sida uu dhigayo Qodobka 6aad, Faqradda 6.1 ee Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee 2017, Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda waxaa ay ku fadhiyaan jagooyin la sameeyey oo maaliyaddooda ay ka timaaddo Miisaaniyadda. Wadarta tirada jagooyinka maaliyaddooda laga bixiyo Miisaaniyada ayaa ah shaqaalaha (*establishment*) Hay'adda Loo Shaqeeyo.

3.3. Madaxa Hay'adda Loo Shaqeeyo ayaa mas'uul ka ah hubinta in qaabka hay'adeed iyo dib-u-eegista xigta e shaqaalaha hay'adda uu yahay mid lagu gaarayo yoolalka iyo ujeeddooyinka hay'adda oo si buuxdana kharashkiisu uga yimaado misaaniyad-sanadeedda.

3.4. Marka la abuuro Wasaarad, abuurista hay'adda waa in dokumenti-gareeyaa iyada oo la adeegsanayo **Dokumentiga Abuurista Hay'ad** (eeg Dokumentiga 13.1 ee la socda Tilmaanta L ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda). Dokumeni-gareyntan oo uu ka mid yahay nuqul qaab-dhismeedka hay'adeed ee lagu talinayo ah waa in loo gudbiyaa Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda si uu u ansaxiyo. Ansaxinta ay ka hadleyso faqraddan waxaa ay la xiriirtaa keliya jagooyinka iyo qaab-dhismeedka. Maaliyadsiinta jagooyinkan waxaa ay ku xiran tahay geeddi-socodka miisaaniyad-sanadeedda. Nuqulka dokumentiyada abuurista hay'adda ee la ansaxiyey waa in dib loogu soo celiyaa Wasaaradda Kale ee leh si loo geliyo gal halka nuqulka asalka ah ay wajib tahay in uu gal ku hayo Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.

3.5. Ansxinta in shaqaale loo qoro jagooyinkii la ansaxiyey waa in uu ansaxiyaa Wasiirka Maaliyadda ka hor inta aan shaqo-qorista loo bilaabin si waafaqsan Xeer-nidaamiyaha 1aad ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda: Habraacyada shaqo-qorista, dalacsiinta iyo beddelaadda shaqaalaha rayidka ah ee dowladda. Shaqo-qorista lagu buuxinayo jagooyinka bannaanwaxaa la ansaxinayaa keliya haddii lagu darey miisaaniyad-sanadeedda.

3.6. Sida uu dhigayo Qodobka 6aad, Faqradda 6.4 ee Xerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee 2017, jago kasta oo ka mid ah shaqaalaha waxaa ay yeelaneysaa lambar jago oo laga soo qaatey tilmaanta qoran ee shaqada sida lagu cayimey Qodobka 6aad, Faqradda 6.1 ee Xeer-nidaamiyahan. Dhammaan Tilmaamaha Shaqada ee Qoran waa in uu ansaxiyaa Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee

Dowladda iyada oo laga ambaqaadayo Qodobka 6aad, Faqradd 6.4 ee Xeer-nidaamiyahan.

3.7. Qaab-dhismeedka heerka darajada iyo heerka mushaarka ee la ansaxiyey ee darajo kasta waa in ay waafaqsanaadaan Xeer-nidaamiyaha 11aad ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda: Mushaaraadka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda. Mushaar iskumid ah ayaa ay qaadanayaan intii isku-darajo ah guud ahaan Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.

# 4. Dib-u-eegista hay'adda

4.1. Madaxa Hay'adda Loo Shaqeeyo ayaa ka mas'uul ah in uu hubiyo in hay'adda loo dhiso si hubineysa in Wasaaradda/Hay'adda ay taabogal ahaato. Sidaa daraaddeed waxaa laga yaabaa in loo baahdo in shaqaalaha (ha'adda) dib-u-eegis lagu sameeyo muddo ka dibba. Marka uu dib-u-eegis ku sameynayo hay'adda, Madaxa Hay'adda Loo Shaqeeyo waa in uu awoodo in uu muujiyo in is-beddelladu ay lagamamaarmaan u yihiin hirgelinta amarro iyo noolal la xiriira siyaasadda hay'adda.

4.2. Is-beddellada lagu sameynayo qaab-dhismeedka hay'adeed waxaa ka mid ahaan kara:

a) Jagooyin dheeri ah
b) In la yareeyo jagooyinka
c) Is-beddello lagu sameeyo doorarka iyo mas'uuliyadaha jagooyinka
d) Is-beddello lagu sameeyo kala-sooca (heerka darajada iyo mushaaarka)

4.3. Marka la soo jeediyo is-beddello lagu sameeyo shaqaalaha hay'adda waa in la dokumenti-gareeyaa iyada oo la adeegsanayo **Foomka Is-beddellada Shaqaalaha Hay'adda** (eeg Dokumentiga 13.2 ee la socda Tilmaanta L ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda) kaas oo faahfaahin ka bixinaya jagooyinka dheeriga ah, ama wax-ka-beddelka lagu sameeyey darajooyinka jagooyinka hadda jira, oo ay la socoto daliil sababeynaya is-beddellada la soo jeedinayo. Dokumentiyadan oo uu ku jiro nuqulka qaab-dhismeedka hay'adeed ee la soo jeedinayo waa in loo gudbiyaa Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda si uu u ansaxiyo. Ansaxinta ay ka hadleyso Faqradda waxaa ay la halmaashaa keliya jagooyinka iyo qaab-dhismeedka hay'adeed oo keliya. Maaliyad-siinta jagooyinkan waxaa ay ku xiran tahay geeddi-socodka miisaaniyad-sanadeedda. Nuqul ka mid ah dokumentiyada shaqaalaha ee la ansaxiyey waa in dib loogu celiyaa Wasaaradda Kale ee ay khuseyso si loogu hayo gal halka nuqulka asalka ahna ay waajib tahay in uu hayo Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.

4.4. Ansxinta in shaqaale loo qoro jagooyinkii la ansaxiyey waa in uu ansaxiyaa Wasiirka Maaliyadda ka hor inta aan shaqo-qorista loo bilaabin si waafaqsan Xeer-nidaamiyaha 1aad ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda: Habraacyada shaqo-qorista, dalacsiinta iyo beddelaadda shaqaalaha rayidka ah ee dowladda. Shaqo-qorista lagu buuxinayo jagooyinka bannaan waxaa la ansaxinayaa keliya haddii lagu darey miisaaniyad-sanadeedda.

4.5. Is-beddel kasta oo lagu sameynayo qaab-dhismeedka hay'adeed ee Waax oo aan miisaaniyad loo haynin waa in lala soo gudbiyaa lacagaha ugu badan ee la soo

jeedinayo in ay ku baxayso shaqaalaha Waaxdaas marka lagu guda jiro geeddi-socodka miisaaniyad-sanadeedda.

4.6. Haddii is-beddellada ay soo hoos-gelayaan miisaaniyadda la hayo (lacagaha ugu badan ee shaqaalaha) ama aaney saameyn ku lahayn miisaaniyadda markaa Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda waxaa uu ansaxin karaa in la hirgeliyo is-beddellada lagu sameynayo shaqaalaha hay'adda.

# 5. Miisaaniyadda iyo Lacagaha ugu Badan ee Ku Baxaya Shaqaalaha

5.1. Madaxa Hay'adda Loo Shaqeeyo ayaa ka mas'uul ah maareynta shaqaalaha iyo kharashaadka mushaaraadka si uu kharashaadka shaqaalaha uusan ka badan lacagaha ugu badan ee loogu qoondeeyey Miisaaniyad-sanadeedda.

5.2. Lacagaha Ugu Badan ee Shaqaalaha waxaa ay ka tarjumeysaa tirada ugu badan ee jagooyinka ee lacago loogu diyaariyey miisaaniyad-sanadeedda.

# 6. Tilmaamaha Qoran ee Shaqada

6.1. Sida uu dhigayo Qodobka 6aad, Faqradda 6.4 ee Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee 2017, jago kasta oo ka mid ah shaqaalaha waxaa ay yeelaneysaa lambar jago iyo tilmaanta shaqada oo sheegeysa waajibaadka ay tahay in laga soo baxo iyo shuruudaha waxbarshada/aqoonta, xirfadeed iyo waayo-aragnimo ee looga baahan yahay jagada. Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ayaa ka mas'uul ah ansaxinta iyo haynta xogta dhammaan jagooyinka jira.

6.2. Tilmaanta qoran ee shaqada waxaa ay bixineysaa qoraal sheegaya hadafka shaqada, xiriirrada shaqo, mas'uuliyadaha, iyo heerka ugu hooseeya ee waxbarashada, shahaaddada, xirfadaha, aqoonta iyo waayo-aragnimada looga baahan yahay in uu haysto qofka qabanaya shaqadaas. Jago kasta oo ka mid ah Waax waa in ay lahaataa tilmaan shaqo oo qoran iyada oo la adeegsanayo **Qaabka Tilmaanta Qoran ee Shaqada** (eeg Dokumentiga 13.3 ee la socda Tilmaanta L ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda).

6.3. Agaasimah Waaxda Shaqaalaha ee Wasaarad Kasta ayaa mas'uul ah diyaarinta tilmaamaha qoran ee shaqada isaga oo la tashanaya maareeyeyaasha u habboon taas oo ay ka mid tahay kala-sooca heerka darajada ee shaqo kasta si waafaqsan Xeer-nidaamiyaha 11aad ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda: Mushaaraadka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda iyo lambarka shaqada la siinayo sida uu dhigayo **Liiska Lambarrada Shaqada** (eeg Dokumentiga 13.4 ee Tilmaanta L ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda).

6.4. Tilmaamaha qoran ee shqada waa uu oggolaadaa Madaxa Hay'adda ay khuseyo ka dibna loo gudbiyaa Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda si uu u ansaxiyo. Nuqul ka mid ah tilmaanta qoran ee shaqada ee la ansaxiyey waa in dib loogu diraa Wasaarada Kale ee ay khuseyso si loo geliyo gal iyada oo nuqulka asalka ahna ay waajib tahay in uu gal ku hayo Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.

6.5. Qof kasta oo ka mid ah shaqaalaha waa in la siiyaa nuqulka tilmaanta qoran ee shaqada ee jagada uu hayo taas oo qayb ka ah geeddi-socodka indho-furka

shaqaalaha sida uu dhigayo Xeer-nidaamiyaha 10aad ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda: Indho-furka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.

6.6. Tilmamaha qoran ee shaqada waa in la diyaariyaa ama dib-u-eegis lagu sameeyaa oo waxna laga beddelaa mar kasta oo Waax ay is-beddel ku sameyso qaabkeeda hay'adeed ayna abuurto jago cusub, dib-u-soocdo jago, wax ka beddesho waajibaayada iyo/ama waxbarashada/shahaaddooyinka jagada, ama ama jago meel kale loo beddelo waana in loo ansaxiyaa si waafaqsan Qodobka 6aad, Faqradda 6.4 ee Xeer-nidaamiyahan.

## 7. Dib-u-eegis uu Hay'adaha ku sameeyo Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladad

7.1. Isaga oo la tashanaya Madaxa Waaxda, Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda waxaa uu marka uu doono, si waafaqsan awoodaha lagu siiyey Qodobka 20aad ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee 2017 dib-u-eegis ku sameyn karaa:

a) tiradajagooyinka ay leedahay Waax;
b) tirada shaqaalaha
c) mansabka, kala-sooca/baadi-sooca iyo darajada mushaarka ee jago;
d) tilmaanta qoran ee jago kasta.

## 8. Cabashooyinka iyo Rafcaannada

8.1. Haddii qof shaqaale ah uu u arko in si aan caddaalad ahayn loogula dhaqmey arrin kasta oo la xiriirta Xeer-nidaamiyahan waxaa uu rafcaan u qaadan karaa Guddiga si uu arrinta ugu baaro si waafaqsan Habraacyada Rafcaannada ee lagu cayimey Qodobka 30aad ee Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee 2017.

## 9. Ansaxinta Xeer-nidaamiyaha

9.1. oo adeegsanaya awoodaha ka Guddoomiyaha Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee Dowlad-goboleedka Jubbaland la iigu siiyey Madaxa V, Qodobka 19aad, Faqradda 19.1 ee Xeerka Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee 2017 iyo Madaxa VIII, Qaybta 33aad, Faqradda 33.1 ee Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee 2017, waxaan soo saarey Xeer-nidaamiyahan oo dhaqangelaya taariikhdan soo socota.



Guddoomiyaha Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda
Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya